

## Muxuu qabtaa sarkaalka baara cabashada shacabku?

Sarkaalka baara cabashada shacabka ayaa ka shaqayn doona inuu xalliyo walaacaaga ama cabashada isagoo adeegsanaya ficillada hoos ku taxan.

### Waxyaabaha sarkaalka baara cabashada shacabka uu samayn karo:

- Dhex dhexaadin ama in uu kuu doodo
- In uu kala tashado bixiyeyaasha wixii ku saabsan xeerarka, dhaqamada iyo nidaamyada
- In uu soo ururiyo oo falanqeeyo macluumaadka
- In uu sameeyo dib u eegis
- Dib u eegis in ku sameeyo dhaawacyada halista ah
- Baaritaan in uu ku sameeyo diiwaanada
- In uu booqo barnaamijyada
- Talo bixin in uu soo jeediyo ficillada sixitaanka, soo saarista warbixinada iyo kormeerka natiijooyinka

## Sidee ayaan ku helaa sakaalkayga baara cabashada shacabka?

Waxaa jira xafiisyo gardoona gobolka oo ku yaal guud ahaan Gobolka Minnesota. Habka ugu fudud ee aad ku ogaan karto cidda ku caawin karta ayaa ah inaad nala soo xiriirto:

Lambarka taleefanka khadka bilaashka ah:

**1-800-657-3506**

Cod: **651-757-1800**

MN Relay Service: wac **711**

Fakis: **651-797-1950**

Email: [ombudsman.mhdd@state.mn.us](mailto:ombudsman.mhdd@state.mn.us)

Website: [mn.gov/omhdd](http://mn.gov/omhdd)



### Macluumaadka xiriirka

Cinwaanka boostada:

**Office of Ombudsman for Mental Health and Developmental Disabilities (Xafiiska Sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka)**

332 Minnesota Street, Suite W1410  
First National Bank Building  
Saint Paul, Minnesota 55101-2117

Soo wac lambarkeena khadka bilaashka ah:

**1-800-657-3506**

Cod: **651-757-1800**

MN Relay Service: wac **711**

Fakis: **651-797-1950**

Email: [ombudsman.mhdd@state.mn.us](mailto:ombudsman.mhdd@state.mn.us)



Dukumiintigan waxaa lagu heli karaa qaabab kale oo loogu talagalay shakhsiyaadka naafada ah iyadoo la adeegsanayo macluumaadka xiriirka kor ku xusan.



**XAFIISKA SARKAALKA BAARA  
CABASHADA SHACABKA EE  
CAAFIMAADKA DHIMIRKA IYO  
NAAFONIMADA KORRIINKA**

Dib loo eegay Abriil 2023



### Hay'ad dawladeed oo madax bannaan:

*“Dhiirrigelinta heerarka ugu sarreeya ee la heli karo ee daawaynta, kartida, hufnaanta iyo caddaalada loogu talagalay dadka qaata adeegyada cudurrada dhimirka, naafonimada korriinka, ku tiirsanaanta kiimikada ama khalkhalka shucuureed ee carruurta.*

## Waa maxay Ombudsman (sarkaalka baara cabashada shacabku)?

Sarkaalka baara cabashada shacabka (Ombudsman) waxay ku qeexday Ururka United States Ombudsman Association inuu yahay: “sarkaal dowladeed oo madax banaan, oo dhexdhexaad ah oo leh awood iyo mas’uuliyad in uu helo, in uu baaro ama in uu si aan rasmi ahayn uga hadlo cabashooyinka ku saabsan falalka dowlada [ama hay’adaha ay dowladu maamusho]. oo, isla markaana, haddii loo baahdo uu daabaco warbixino iyo talo soo jeedin.”

## Yuu u shaqeeyaa sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafanimda Korriinku?

Qof kasta oo qaata adeegyo ama daaweyn cudurada dhimirka oo laga helay, naafonimada korriinka, ku tiirsanaanta kiimikada ama khalkhalka shucuureed oo ka hela hay’ad, xarun ama barnaamij.

**Hay’ada** waxaa loola jeedaa qaybaha, saraakiisha ama shaqaalaha Waaxaha Adeegyada Aadanaha, Caafimaadka ama Waxbarashada, degmooyinka iskuulada deegaanka, ama hay’adaha adeega bulshada ee degmada ee kormeera, bixiya ama sharci ahaan u nidaamiya adeegyada ama daawaynta macaamiisha sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka.

**Xarun ama Barnaamij** waxaa loola jeedaa barnaamij xarun la dego ama mid aan degaan ahayn ama xarun bukaan-jiif ah oo daryeel leh oo ku siisa adeegyo ama daaweyn.



## Sidee ayuu sarkaalka baara cabashada shacabku ii caawin karaa?

**Sarkaalka baara cabashada shacabka (Ombudsman) ayaa wuxuu bixin karaa macluumaad iyo latashi ku saabsan:**

- Xuquuqdaada
- Xulashooyinkaaga adeega
- Shuruuca iyo qawaaniinta khuseeya adeegyada aad qaadata
- Masuul in aad lahaato
- Su’aalaha guud ee ku saabsan adeegyadaada ama adeegyo la’aanta

**Sarkaalka baara cabashada shacabka ayaa dib u eegi kara oo ka shaqayn kara sidii loo xalin lahaa tabashooyinkaaga ama cabashooyinkaaga ku saabsan:**

- Dhaqamada yaraynaya sharaftaada iyo madax-banaanidaada
- Welwelka ku saabsan caafimaadkaaga, amnigaaga iyo/ama fayyo-qabkaaga
- Tayada daryeelka ama adeegyada aad hesho
- Ku xadgudubka xuquuqdaada
- Helitaankaaga adeegyada kugu habboon
- Ka joojinta adeegyadaada ama ka saarista
- Forsaddaada inaad maamusho iyo aad waxyaabaha aad rabto ka doorato meesha aad ku nooshahay, aad ka shaqayso iyo aad ku bulshayso
- Su’aalaha guud ee khuseeya adeegyada

## Maxay tahay in aad samayso kahor inta aadan soo wicin sarkaalka baara cabashada shacabka?

**Waxaa laga yaabaa in aad awoodo inaad si toos ah u xallisaan waxyaabaha aad ka welwelsantahay iyada oo aan lagu caawinin:**

Tixgeli talaabooyinkan si aad isugu daydo inaad xallisaan wixii dhibaato ah, ha ahaato mid ku lug leh hay’ad dawladeed ama shirkad ka mid ah hay’adaha gaarka loo leeyahay.

- **Diyaargarow** - hayso macluumaadka ku habboon inta aadan soo wicin hay’ada ama barnaamijka. Wicitaan taleefan oo gaaban ayaa waxaa laga yaabaa in uu badbaadiyo wakhti saacado badan iyo madax xanuun.
- **Hayso Diiwaanka** - qoro xasuus qor, weydiiso magacyada iyo cinwaanada dadka aad la hadlayso oo xafido dhammaan xiriiradaas.
- **Weydii su’aalo** - weydii sababta ay shaqaalaha hay’ada ama barnaamijku u sameeyeen waxa ay sameeyeen. Weydiiso sharciyada, xeerarka ama qawaaniinta lagu dabaqayo.
- **Akhriso Wax Kasta Oo Lagu soo Diray** - Go’aano badan oo hay’aduhu ay go’aamiyaan ayaa laga yaabaa in rafcaan laga qaato, laakiin waxaa jira wakhtiyo kama dambays ah iyo habraacyo ay tahay in la raaco.

Haddii aadan rabin inaad adigu aad la xiriirto, ama haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta lagu siiyay, xor ayaad u tahay in aad lasoo xiriirto sarkaalka baara cabashada shacabka (Ombudsman).